QEYBTA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA

Su’aalaha Badanaa La Isweydiiyo ee ‘Get Vaccinated Oregon’

(3-26-2021)

S1: Maxay samaysaa Get Vaccinated Oregon?

J1: Aalada Get Vaccinated Oregon waxay kuu sheegeysaa haddii aad buuxiso shuruuda u qalmida tallaalka hadda ee gobolka-oo-dhan. Sidoo kale waxay kuu suurtogelisaa inaad sameysato ogeysiino fariin qoraal ah ama i-meel ah si aad u ogaato goorta aad ugu qalantid heerka gobolka. Markii aad u qalantid, aaladaan waxay sidoo kale kaa caawineysaa inaad heshid bixiyaha tallaalka ama goobaha tallaalka ee kuugu dhow.

Gobolkaaga waxaa laga yaabaa inay u furto u qalmida dad badan ka hor jadwalka gobolka. Waxaad ka baran kartaa u qalmida heerka-gobolka halkan:https://www.oregon.gov/oha/covid19/Pages/vaccine-information-by-county.aspx

FIIRO GAAR AH: OHA waxay la shaqeyneysay gobolada qaarkood, oo ay ka mid yihiin gobolada Multnomah, Washington, Clackamas, Columbia iyo Marion, ee leh aaladaha balan qabsiga la xakameeyay. Dadka deggan goboladaas, OHA waxay bixinaysay liisaska ama shakhsiyaadka aalada buuxisa shuruuda u qalmida si ay uga caawiso jadwaleynta. Tani waxay ku xirantahay inta tallaal ee uu bixiye kasta hayo

S2: Miyay Get Vaccinated Oregon iga caawinaysaa inaan qabsado ballan tallaal?

J2: Iyadoo Get Vaccinated Oregon qudheeda aysan ahayn aalad ballan qabsiga, waxaad u isticmaali kartaa inaad hesho bixiyayaasha tallaalka ee kuu dhaw. Markaad raadiso bixiye tallaal, waxaa lagu siinayaa macluumaadka xiriirinta bixiyaha ama websayka, si aad wax badan uga baratidama si aad si toos ah bixiyaha uga qabsatid ballanta tallaalkaaga.

Haddadan, kaliya dadka buuxiya shuruudaha u qalmida ee gobolka-oo-dhan ayaa heli kara bogga raadinta ee Get Vaccinated Oregon.

FIIRO GAAR AH: OHA waxay la shaqeyneysay gobolada qaarkood, oo ay ka mid yihiin gobolada Multnomah, Washington, Clackamas, Columbia iyo Marion, ee aaladaha balan qabsiga la xakameeyay. Dadka deggan gobolada, OHA waxay bixinaysay liisaska shakhsiyaadka ee ka imaanayo aalada buuxiso shuruuda u qalmida si ay uga caawiso balansiga. Tani waxay ku xirantahay inta tallaal ee uu bixiye kasta hayo

S3: Sidee baan u isticmaalaa Get Vaccinated Oregon?

J3: Si aad u bilawdo Get Vaccinated Oregon, fadlan booqo getvaccinated.oregon.gov oo riix “Get Started.” Waxaad u baahaneysaa inaad eegto u qalmidaada ka hor intaadan isu diiwaangelin ogeysiimaha, aadan sameysan koonto, ama aadan raadin bixiyaha tallaalka. Haddii aad horey u haysatay koonto Get Vaccinated Oregon, riix “Login” ee ku qoran xagga sare ee midigta bogga-internetka oo kadib riix “x” ee sanduuqa soo baxa si aad u gasho.

S4: Miyaan isu diiwaangelin karaa ogeysiimaha ama sameysan karaa koontada Get Vaccinated Oregon aniga oo aan hubin u qalmideyda?

J4: Maya. Fadlan hubi u qalmidaada marka hore. Waxaan kaa codsanaynaa inaad ka jawaabtid su’aalaha u qalmida ka hor inta aadan isu diiwaangelin ogeysiimaha ama aadan sameysan koontada Get Vaccinated Oregon, si markaas aan kuu siino macluumaadka ugu saxsan ee la xiriira u qalmidaada iyo bixiyayaasha tallaalka.

S5: Haddii aan iska diiwaangeliyo Get Vaccinated Oregon, miyay damaanad qaadaysaa inaan helayo tallaal?

J5: Qof walbo oo reer Oregon ah oo rabo in la tallaalo wuxuu helayaa tallaalka COVID19 billaha soo socda. Wakhtigaan hadda ah, tallaalada way saad xadidanyihiin, marka waxaan u bahannahay inaan dadka tallaalno wakhtiyada soo socda. Get Vaccinated Oregon wuxuu kaa caawini karaa inaad ogaato goorta aad u qalantid inaad hesho tallaalka iyo meesha aad ka helayso ballanta tallaalka.

Fiiro gaar ah: Nidaamyada tallaalka ee quseeyo xukunka qowmiyadaha ayaa kala duwaanaan kara. Fadlan ka hubso bixiyaha qowmiyadaada.

S6: Miyuu jiraa fiidiyow aan ka baran karo sida loo isticmaalo aalada Get Vaccinated Oregon?

J6: Haa. Waxaad ka baran kartaa sida la isku diiwaangeliyo iyo loo isticmaalo aalada Get Vaccinated Oregon adigoo daawanaya fiidiyowgan:https://youtu.be/lmsi_uOCRV0

S7: Ka waran haddii aan horaan iskaga diiwaangeliyay in la i soo ogeysiiyo u qalmidayda tallaalka iyadoo la adeegsanayo bixiye kale?

J7: Waan ku soo dhaweynaynaa inaad sidoo kale iska diiwaangeliso Get Vaccinated Oregon. Iska diiwaangelinta in kabadan hal meel micnaheedu ma ahan inaad dhaqso helayso tallaalka.

Markii wajiyo tallaal oo cusub ay ka furmaan gobolka oo dhan, dhammaan isticmaalayaasha u qalma ee ka diiwaangashan Get Vaccinated Oregon waa la soo ogeysiinayaa.

S8: Sidee ayaa warbixinteyda loo isticmaalayaa?

J8: Warbixinta aad ku wadaagtay aaladaan waxaa loola dhaqmayaa si qarsoodi ah. Waxaa lala wadaagayaa kaliya bixiyayaasha tallaalka ee maxalliga si ay nooga caawiso qorsheynta saadka.Waxaa laga yaabaa in lala wadaago bixiyayaasha daryeelka caafimaad si ay kaaga caawiso inaad hesho ballan

S9: Miyay Get Vaccinated Oregon iga caawin kartaa inaan qof kale ka diiwaangeliyo ogeysiimaha tallaalka? Imisa qof ayaan ku haysan karaa koontadeyda?

J9: Haa. Mar haddaad isku diiwaangeliso cinwaanka i-meelkaaga, waxaad ku dari kartaa koontadaada dad dheeraad ah, sida ilmo, waalid, ama qof aad daryeeleyso. Tani waxay kuu ogolaaneysaa inaad eegtid u qalmidooda oo aad sameysid ogeysiimaha u qalmida adigoo matalayo. Ma jirto wax xadeyn ah ee inta qof ee aad ku haysan karto koontada.

S10: Miyaan diiwaangelin karaa qof kale?

J10: Waxaad ku sameyn kartaa ogeysiimaha u qalmida matalaada qof ku jiro daryeelkaaga, sida ilmo, waalid, ama macmiil.

S11: Miyaan iska diiwaangelin karaa ogeysiimaha tallaalka COVID-19 oo qaas ah?

J11: Maya. Haddii aad iska diiwaangelisid ogeysiimaha adigoo adeegsanayo aaladaan, waxaad heleysaa warbixinada soo kordha iyadoo ku saleysan u-qalmidadaada tallaalka. Markii aad u qalantid inaad heshid tallaal, waxaad ka raadin kartaa bixiyaha tallaalka gobolkaaga.

S12: Ka waran haddii aan hadeer u qalmin tallaal?

J12: Fadlan isticmaal Get Vaccinated Oregon si aad isaga diiwaangelisid warbixinada soo kordha ee u qalmida. Waxaan kuu soo diri karnaa i-meel ama fariin qoraal ah markii uu tookadaada la gaaro inaad tallaal heshid, iyo sidoo kale waxaan soo direynaa macluumaad muhiim ah kale ee tallaalka COVID-19. Markii aad heshid ogeysiinta u qalmida, waxaad u baahan kartaa inaad gashid oo aad ka jawaabtid su'aalaha dheeraad ah si aad u xaqiijisid u qalmida.

S13: Muxuu yahay farqiga udhaxeeyo koontadeyda iyo "la-diiwaangeliyaha"?

J13: Waxaan kuu weydiineynaa inaad sameysatid koonto sababaha soo socda awgood:

- Dadka u qalma waxay geli karaan koontadooda si ay u helaan bixiyaha tallaal ee u dhow.
- Dhammaan haystayaasha koontada waxay geli karaan koontadooda oo waxay cusbooneysiin karaan warbixintooda, sida loogu baahan yahay. Haystayaasha koontada waxay iska diiwaangelin karaan ogeysiimaha u qalmida waxayna raadin karaan bixiyaha tallaal iyagoo matalaya qof kale, sida ilmo ama macmiil. Qofkaan kale waxaa lagu magacaabaa la-diiwaangeliiye. Haystaha koontada iyo la-diiwaangeliyaha waxay lahaan karaan macluumaadka xiriirka la doorbiday ee kala duwan, laakiinse tani looma baahna.
- *Tusaale ahaan: Haddii aad daryeele u tahay macmiil naafo ah, waxaad marka hore naftaada u sameyneysaa koonto. Kadib, waxaad u diiwaangelineysaa macmiilkaaga sida la-diiwaangeliye gudaha koontadaada. Waxaad kadib dooran kartaa in lagu soo ogeysiiyo markii aad u qalantid iyo markii macmiilkaaga u qalmo inay helaan tallaalkooda*.

S14: Goorma ayaan helayaa ogeysiimaha?

J14: Waxaad heleysaa ogeysiimaha markii aad iska diiwaangelisid koontadaada cusub. Waxaad sidoo kale heleysaa ogeysiimaha ku saabsan fursadaha tallaalida ee deegaankaaga Haddii aadan hadeer u qalmin, waxaad heleysaa ogeysiimo goorta aad u qalantid tallaalka.

S15: Miyaad u baahan tahay inaad "koonto sameysato" si aad u hesho ogeysiimaha?

J15: Maya. Waxaad iska diiwaangelin kartaa inaad heshid ogeysiimaha adigoon sameysan koonto.

S16: Miyay Get Vaccinated Oregon ii ogolaaneysaa inaan diiwaangeliyo wax ka badan hal qof, si markaa naloo tallaalo isla maalin ama isku meel?

J16: Waxaad heli kartaa tallaal kaliya markii aad u qalantid. Waxaad ka diiwaangelin kartaa la-diiwaangeliye badan koontadaada, oo waxaa laga yaabaa inaadan noqon dad u qalma isku wakhti. Aaladaan hadeer kuuma ogolaaneyso inaad qabsatid ballantaada tallaalka.

S17: Waxaa iga lumay magaceyga isticmaalaha iyo baswuudhka. Sidee ayaan ku galaa?

J17: Fadlan eeg linkiga 'forgot password' oo raac tilmaamaha haddii aad ku galeyso i-meel ahaan. Haddii aad ku galeyso taleefanka, kaliya geli lambarka taleefankaaga oo waxaad heleysaa koodh xaqiijin ah. Ma jirto wax erayga sirta ah ee koontooyinka lagu sameeyey taleefonka.

S18: Miyaan badeli karaa jawaabaheyga?

J18: Haddii aad sameysay koonto, waxaad ku beddeli kartaa jawaabahaaga adigoo gala. Gudaha koontadaada, waxaad ka eegi kartaa u qalmidaada ama u qalmida aad bixisay adigoo matalayo la-diiwaangeliye. Waxaad sidoo kale ku dari kartaa ama ka saari kartaa la-diiwaangeliiyayaasha koontadaada.

Haddii aad isku diiwaangelisay inaad kaliya hesho ogeysiimo, waxaad u baahan tahay inaad ka jawaabto su'aalaha mar labaad adigoo ku bilaabaya "Get Started" ee getvaccinated.oregon.gov.

Fiiro gaar ah: Haddii aad ku sameysatay kootadaada lambarka taleefonkaaga, ma lahaaneysid ereyga sirta ah ee koontada. Taa beddelkeeda waxaad ku heleysaa koodhka xaqiijinta ah dhinaca fariin qoraalka mar walba oo aad ku gasho lambarka taleefonkaaga.

S19: Waxaan u baahannahay in la iga caawiyo isticmaalka aaladaan.

J19: Fadlan soo wac 211 ama 1-866-698-6155 (furan 6–da subaxnimo ilaa 7-da fiidnimo maalin walba) waxaana nidaamkaan kaa caawinaya hawlwadeen. Wakhtiyada sugitaanka way dheeraan karaan sababo la xiriiro wacitaanada badan awgood oo waxaad xulan kartaa ikhtiyaarka dib laguugu soo waco beddelkii aad ku sugi laheyd khadka. Haddii aad ubaahantahay turjubaanka luqad uusan nidaamka

online-ka taageerin, fadlan soo wac 211 ama 1-866-698-6155. Waxaad kula hadli kartaa hawlwadeenka af Igiriisi ama Isbaanish. Tarjumaad lacag la'aan ah ayaa loo heli karaa luuqadaha kale oo dhan. Wixii shaqsiyaadka qabo naafo nimada ama shaqsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn af Ingiriisi, Maamulka Caafimaadka Oregon waxay ku bixin kartaa macluumaad qaabab kale sida turjumaado, daabacaad far waa weyn, ama qoraalka dadka indhoolaha. Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka lambarka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us.

S20: Waxaan kala kulmayaa dhibaatooyin sameynta koontadeyda, maxaan sameeyaa?

J20: Waxaa jiro waxyaalo yar oo ah in la xasuusto marka lagu sameynayo koonto GVO. Haddii aad ugu baahato caawin dheeraad ah is-diiwaangelinta ama sameynta koonto, fadlan eeg **Q18: Waxaan u baahannahay in la iga caawiyo isticmaalka aaladaan** wixii ah tilmaamo sida loo helo caawimaad.

- Ereyada sirta ah waa inay ahaadaan 6 xaraf ama ka badan Xarfo, lambaro, iyo xarfaha gaarka ah dhammaan waa la oggolyahay
- Koodhka i-meelka ee lagu xaqiijiyo sameynta koontadaada wuxuu ku dhacayaa 3 maalmood gudahood.
- Haddii aadan awoodin inaad eegto ama gasho cinwaanka i-meelkaaga si aad u xaqiijiso, kuuma suurtogaleyso inaad sii wado is-diiwaangelinta.

:S21: Waxaan qabaa su'aalo kale oo ku saabsan tallaalada COVID-19.

J 21: Fadlan booqo covidvaccine.oregon.gov, u dir qoraalka ah ORCOVID lambarka 898211 si aad ugu heshid fariin/SMS warbixinada cusub (af Ingiriis iyo af Isbaanish kaliya) ama i-meel u dir ORCOVID@211info.org. Haddii aan su'aashaada tallaalka COVID-19 looga jawaabin websaydka, fariin ahaan, ama i-meel ahaan, ka soo wac xarunta wacitaanka lambarka 211 ama 1-866-698-6155. Waxay furan tahay laga bilaabo 6-da subaxnimo illaa 7-da fiidnimo maalin walba, oo ay ku jiraan maalmaha fasaxyada. Wakhtiyada sugitaanka way dheeraan karaan maadaama ay wicitaanada fara badan yihiin. Waxa jira ikhtiyaar ah in dib laguu soo waco beddelkii aad sugi lahayd. Af Ingiriska iyo Ispanishka ayaa looga hadlaa xarumaha wicitaanka. Tarjumaad lacag la'aan ah ayaa loo heli karaa luuqadaha kale oo dhan. TTY: Garaac 711 ama soo wac lambarka 1- 866-698-6155.

Q22: Miyey dadka Oregon ee horey uga sameystay gelitaan websaydka Get Vaccinated Oregon diiwaangashan yihiin oo qof miyaa nasoo wacayo si aan u balansano tallaalka? Ama miyaan u baahananhay inaad iska diiwaangelino meel kale?

A22: Aalada Get Vaccinated Oregon ayaa kuu sheegeysa haddii aad hadeer u qalantid inaad ka heshid tallaal Oregan. Haddii aadan weli u qalmin, waxay kuu suurtogalineysaa inaad sameysatid ogeysiimaha faarinta qoraalka ama i-meelka ah si laguu soo ogeysiiyo markii aad u qalantid. Markii aad u qalanto, aalada waxay sidoo kale kaa caawineysaa inaad heshid bixiyaha tallaalka ama goobaha tallaalka ee kuugu dhow. Haddii aad ku nooshahay Gobolada Clackamas,

Washington, Multnomah, ama Columbia, oo aad jirto da'da 65 sanno ama ka weyn, waxaa laga yaabaa in si aan kala soocid lahayn laguu doorto inaad u heshid ballan ee Oregon Convention Center iyadoo loo maraya All4Oregon.

Q23: Waxaa la isoo ogeysiiyay in koontadeyda la xiray sababtuna tahay howl la tuhunsanyahay. Goorma ayaan isku dayi karaa inaan markale galo?

J23: Haddii lagaa xiray koontadaada "sababtuna tahay howlo aan caadi ahayn," sug 24 saacadood, kadib isku day inaad gasho mar labaad.

S24: Shaashadeyda 'way dantay' anigoo sameysanaya is-diiwaangelinteyda, maxaan sameeyaa?

J24: Tani waxay dhacdaa markii uu koontadaada u baahan tahay in la xaqiijiyo. Fadlan eeg i-meelkaaga ama mobeelkaaga si aad u xaqiijiso koontada ka dibna ku laabo bogga. Qaybta 'dantay' waa inay baaba'daa oo waad sii wadi kartaa.

S25: Sideen ku ogaadaa markaan saf ugu jiro ballan? Miyaad si toos ah saf ugu jirtaa markii aad koonto sameysato? Haddii ay ku tusiineyso " Eligible " miyaan ku jiraa saf ama dhab ahaan "wax walba waa hagaag" in "dib la ii soo waco" oo uma baahni inaan wax kale sameeyo. Ma saf baan ugu jiraa ballan ama maya?

J25: Iska diiwaangelinta aaladaan Get Vaccinated Oregon macnaheeda ma ahan inaad ka diiwaan gashan tahay ballan. Aalada Get Vaccinated Oregon ayaa ku sheegeysa haddii aad hadeer u qalantid inaad ka heshid tallaal Oregan. Haddii aadan weli u qalmin, waxay kuu suurtogalineysaa inaad sameysatid ogeysiimaha faarin qoraalka ama i-meelka si laguu soo ogeysiiyo markii aad u qalantid. Markii aad u qalantid, aaladaan waxay sidoo kale kaa caawineysaa inaad heshid bixiyaha tallaalka ama goobaha tallaalka ee kuugu dhow. Haddii aad ku nooshahay Gobolada Clackamas, Washington, Multnomah, ama Columbia, oo aad jirto da'da 65 sanno ama ka weyn, waxaa laga yaabaa in si aan kala soocid lahayn laguu doorto inaad u heshid ballan ee Oregon Convention Center iyadoo loo maraya All4Oregon.

Xagee ayaan u aadi karaa macluumaad dheeraad ah?

- Booqo covidvaccine.oregon.gov.
- Ku dir fariin qoraal ORCOVID lambarka 898211 si aad ugu heshid fariin/SMS warbixinada cusub (af Ingiriis iyo af Isbaanish kaliya).
- I-meel u dir ORCOVID@211info.org.

Haddii aanan lagaaga jawaabin su'aashaada tallaalka COVID-19 covidvaccine.oregon.gov, qoraal ahaan, ama i-meel ahaan, ka wac xarunta wicitaanka lambarka 211 ama 1-866-698-6155. Waxay furan tahay 6da subaxnimo ilaa 7da fiidnimo. maalin kasta, oo ay ku jiraan maalmaha fasaxa.

- Wakhtiyada sugitaanka way dheeraan karaan maadaama ay wicitaanada fara badan yihiin. Waxa jira ikhtiyaar ah in dib laguu soo waco beddelkii aad sugi lahayd.

- Af Ingiriska iyo Ispanishka ayaa looga hadlaa xarumaha wicitaanka. Tarjumaad lacag la’aan ah ayaa loo heli karaa luuqadaha kale oo dhan.
- TTY: Garaac lambarka 711 ama wac 1-866-698-6155.

Helitaanka dukumiintiga: Wixii shaqsiyaadka qabo naafo nimada ama shaqsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn af Ingiriisi, OHA waxay ku bixin kartaa macluumaad qaabab kale sida turjumaad, daabacaad far waa weyn, ama qoraalka dadka indhoolka. Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka lambarka 1-844-882-7889, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us.